# Xuquuqdaada iyo Ilaalintaada Ka Dhanka ah Biilasha Caafimaadka ee Kediska ah

Marka aad hesho daryeelka xaaladaha degdega ah ama lagugu daweeyo xarun ama rug caafimaad oo ka baxsan shabakada isbitaalada, waxa lagaa ilaalinayaa biilasha kediska ah ama haraaga biilasha.

**Waa maxay "haraaga biilasha" (mararka qaarkood loo yaqaan "biil kedis ah")?**
Markaad la kulanto dhakhtar ama daryeel-bixiye ee caafimaad, waxaa laga yaabaa in lagugu yeesho kharashyo jeebka ka baxsan, sida lacag-bixinta wadaagga ah, lacagta lala bixiyo shirkadda caymiska, iyo/ama lacag laga jari karo. Waxaa laga yaabaa in lagugu yeesho kharashyo kale ama aad ku khasbanaato inaad bixiso dhammaan biilka haddii aad u tagto adeeg-bixiye ama aad booqato xarun daryeel caafimaad oo aan ku jirin shabakada caymiskaaga caafimaad.

"Shabakadda ka baxsan" waxaa loola jeedaa adeeg-bixiyeyaasha iyo xarumaha ee aan heshiiska la saxiixin shirkadda caymiska ee caafimaad. Adeeg-bixiyeyaasha shabakadaha ka baxsan ayaa laga yaabaa in loo ogolaado inay kugu soo dallacaan farqiga lacageed ee u dhexeeya kharashka ay shirkadda caymiskaaga oggolaatay inay bixiso iyo lacagta buuxda ee laguugu soo dallacay adeegga. Taasi waxa loo yaqaanaa "haraaga biilka." Lacagtani waxay u badan tahay inay ka badnaato kharashyada ay adeeg-bixiyaasha ku jira shabakadda kaaga qaadi lahaayeen isla adeeggaas waxaana laga yaabaa inaan lagu xisaabinin xadka lacagta jeebkaaga ee sannadlaha ah.

"Biilka kediska ah" waa haraaga biilka ee lama filaanka ah. Tani waxay dhici kartaa marka aadan xakameyn karin cidda ku lug leh daryeelkaaga—tusaale ahaan marka aad ku jirto xaalad degdeg ah ama marka aad qorshaysato inaad booqato xarunta shabakada ka mid ah laakiin si lama filaan ah uu kuu daweeyo adeeg-bixiye ka baxsan shabakada.

**Waxaa lagaa ilaalinayaa haraaga biilasha ee:**

**Adeegyada xaaladaha degdega ah**

Haddii aad qabto xaalad caafimaad oo degdeg ah oo aad adeegyada xaaladaha degdegga ah ka hesho adeeg-bixiye ama xarun ka baxsan shabakadda, waxa ugu badan ee adeeg-bixiyayaashaas ay kugu soo dallici karaan waa caddadka qiimo-wadaagga ee adeeg-bixiyaasha shabakadda caymiskaaga ka tirsan (sida lacag-bixinada la wadaago iyo caymiska la wadaago). Laguguma soo dallici karo haraaga biilka kharashyada adeegyadan xaaladaha degdegga ah. Waxaana ka mid ah adeegyada laga yaabo in lagu siiyo kadib marka aad gasho xaalad degan marka laga reebo haddii aad bixiso ogolaansho qoraal ah oo aad ka tanaasusho ilaalinta aad xaqa ugu lahayd in aan lagugu soo dalacin haraaga biilka kharashyada adeegyadan la bixiyo kadib marka aad xasillooni gasho.

**Adeegyada qaarkood ee laga helo isbitaalka ama xarunta caafimaadka ee ku jira shabakadda caymiska**

Markaad adeegyo ka hesho isbitaalka ama xarunta caafimaadka ee ku jira shabakadda caymiska, adeeg-bixiyeyaasha qaarkood waxa laga yaabaa inay yihiin kuwo ka baxsan shabakadda caymiska. Xaaladahan oo kale, waxa ugu badan ee adeeg-bixiyayaashaas ay kugu soo dallici karaan waa caddadka qiimo-wadaagga ee adeeg-bixiyaasha shabakadda caymiskaaga ka tirsan. Tani waxay khusaysaa daawooyinka xaaladaha degdega ah, daawooyinka suuxinta, baaritaanada unugyada jirka, baaritaanada shucaaca, shaybaadhka, daryeelka iyo daaweynta dhallaanka (neonatology), kaaliyaha dhakhtarka qalliinka, shaqaalaha isbitaalka, ama adeegyada daryeelka degdegga ah. Adeeg-bixiyeyaashani kuguma soo dalaci karaan haraaga biilka kumana waydiin karaan inaad ka tanaasusho xaquuqdaada ah inaan lagugu soo dalacin haraaga biilka.

Haddii aad adeegyo kale ka hesho xarumahan ka tirsan qorshaha caymiska, adeeg-bixiyeyaasha ka baxsan shabakadda kuguma soo dalaci karaan haraaga biilka, marka laga reebo haddii aad bixiso ogolaansho qoraal ah oo aad kaga tanaasulayso xaquuqdaas.

Marna lagaagama baahna inaad ka tanaasusho xaquuqda aad u leedahay inaan lagugu soo dalacin haraaga biilasha. Sidoo kale lagaagama baahna inaad daryeel ka hesho meel ka baxsan

shabakada caymiska. Waxaad dooran kartaa adeeg-bixiye ama xarun caafimaad oo ku jirta shabakada qorshahaaga caymiska.

**Marka haraaga biilasha aan la ogolayn, waxaad sidoo kale leedahay xaquuqaha/ilaalinada soo socda:**

- Keliya waxaad mas'uul ka tahay bixinta qaybtaada ee kharashka (sida lacag-bixinta la wadaago, caymiska la wadaago, iyo lacagaha lagaa jari karo ee aad bixin lahayd haddii adeeg-bixiyaha ama xarunta ay ahaan lahayd mid ka tirsan shabakadda caymiska). Shirkaddaada qorshaha caafimaadka ayaa si toos ah u bixin doonta kharashaadka adeeg-bixiyayaasha iyo tas-hiilaadka ee ka baxsan shabakada.
- Guud ahaan shirkadda qorshahaaga caafimaad waa inay:
- Dabooshaa adeegyada xaaladaha degdegga ah adigoon lagaaga baahnayn inaad oggolaansho hore u hesho adeegyada (ogolaanshaha hore).
- Dabooshaa adeegyada xaaladaha deg-degga ah ee ay bixiyaan adeeg-bixiyeyaasha ka baxsan shabakadda.
- Waxa uu kugu leeyahay adeeg-bixiyaha ama xarunta (qiimo-wadaaga) ku salaysaa waxa ay siin lahayd adeeg-bixiye ama xarun ka tirsan shabakadda caymiska waana inay cadadkaas ku muujiso sharaxaada gunnooyinkaaga.
- Caddad kasta oo aad ku bixiso adeegyada xaaladaha degdegga ah ama adeegyada ay bixiyaan xarumaha shabakadda caymiska ka baxsan ku dartaa xadka lacagtaada jeebka iyo lacagaha laga jari karo caymiskaaga.

Haddii aad aaminsantahay in si khaldan kharash laguugu soo dalacay, waxaad kala xiriiri kartaa Adeegga Macmiisha ee Biilasha (Billing Customer Service) 1-877-430-8495 ama 1-513-636-4427 oo dooro xulashada 9.

Booqo *https://www.cincinnatichildrens.org/patients/resources/billing* (kaliya lagu heli karo luuqada Ingiriisiga) si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada sida uu dhigayo sharciga federaalka.